# Tijaabada Miisaanka ee ku aaddan Baaritaannada Asalka Bixiyaha ODHS | OHA

## MAXAA LAGU QIIMEEYAA BAARITAANKA MIISAANKA

Unuga Baaritaanka Asalka (BCU) waxay baaritaanno taariikhda dambiyada iyo taariikhda xadgudubka ku samaysaa bixiyeyaasha daryeelka iyo shaqaalaha xarunta ee kala duwan ee barnaamijyada Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon (ODHS) ee u dhexeeya Dadka Da'da iyo Kuwa Naafada ah iyo Daryeelka Ilmaha, ilaa Barnaamijka Daryeelka Ilmaha iyo Naafada Korriinka.

Intaa waxaa dheer, BCU waxay sidoo kale baaritaanno asal ku sameysaa dhowr ka mid ah bixiyeyaasha Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) sida Shaqaalaha Caafimaadka Dhaqanka, bixiyeyaasha caafimaadka dhimirka, iyo qaar ka mid ah bixiyeyaasha caafimaadka dadweynaha.

Hannaanka baaritaanka asalka wuxuu ka bilaabmaa ***shakhsiga lahadal hayo*** (***SI)*** isagoo bixinaya macluumaadka soo socda:

- *Macluumaadka aqoonsashada, sida magaca buuxa, naanaysyada, taariikhda dhalashada, deganaanshaha hadda, iyo taariikhda hore ee degenaanshaha.*
- *Lambarka Ammaanka Bulshada waa ikhtiyaari laakiin waxaa laga yaabaa inay kaa caawiso si sax ah in loo aqoonsado SI-ga.*
- *Liiska dhammaan xukunnada iyo xaaladaha laga yaabo inay keenaan u-qalmitaan la'aanta. SI waxaa sidoo kale laga yaabaa inuu bixiyo liiska dhammaan xiritaannada, eedeymaha, iyo xukumada, iyadoo aan loo eegayn inta ay muddadu dheer tahay ama inta uu SI waqtigaas jiray.*
- *Haddii SI uusan dib u soo xasuusan taariikhdiisa ama keeda hore, bixinta qiyaas ayaa ugu fiican. SI-gu waa inuu qoraa waxa la yaqaano oo uu sharaxaad ka bixiyo sababta iyadu/isagu aanay u haynin tafaasiisha oo dhan haddii ay wax badan jiri karaan.*
- *Macluumaadka kale ee ka soo baxa SI-ga ayaa* ***aad*** *waxtar ugu leh baaritaanka miisaanka. Qaar ka mid ah macluumaadkan iyo sida loogu isticmaalo BCU ayaa hoos lagu sharaxay.*

***Xaaladaha iyo xukunnada suurtagalinaya u-qalmitaan la'aanta*** (***PDQ-yada***) waxaa ka mid ah dambiyada qaarkood, xaaladaha dambiyada la xiriira, iyo xadgudubka daran.  Haddii SI uu leeyahay PDQ-yo, BCU waa in ay samayso tijaabo miisaan. BCU waxay miisaami doontaa dhinacyada togan iyo kuwa taban ee PDQ-yada iyo isbeddellada tan iyo PDQ-yada si loo go'aamiyo haddii SI-ga uu khatar ku yahay shakhsiyaadka nugul, oo uu sameeyo go'aaminta fayoqabka la ansixiyay, lagu ansixiyay xayiraadaha, ama la diiday.  Haddii la diido ama la siiyo ansixin xaddidan, SI waxa uu xaq u leeyahay dacwad dhageysi.

PDQ-yadu waxay ku jiraan liiskan:

- *Lifaaqa dambiilaha PDQ ee ku aadan SI-yada la xiriira wakaaladaha daryeelka ilmaha*
- *Liiska dambiyada PDQ ee loogu talagalay dhammaan bixiyayaasha kale ee ODHS|OHA samaynta baaritaannada iyadoo la maraayo BCU*
- *Xadgudubka PDQ ee ku aadan dhammaan bixiyayaasha ODHS|OHA samaynta baaritaannada iyadoo la maraayo BCU*

Sidoo kale arag Xeerarka Maamulka Oregon (OAR 407-007-0281 iyo OAR 407-007-0290).

## QORAAL MUHIIM AH:

Shaqooyinka qaarkood waxay hoos yimaadaan qawaaniinta iyo xeerarka federaalka ama gobolka ee ugu baahan in xukunnada dambiyada gaarka ah ama shuruudaha kale ay ka dhigaan codsadaha mid aan si toos ah ugu qalmin. Natiijo ahaan, BCU ma samayn karto tijaabada miisaanka sababtoo ah SI-ga si sharci ah looguma tixgelin karo jagada.

Shakhsiyaadka soo codsanaya jagooyinka hoos imanaya qawaaniinta ama xeerarka federaalka ama gobolka oo la ogaaday inay leeyihiin xukunnadan ama shuruudahan "ka-reebista khasabka ah" ma lahan xuquuq dacwad dhageysi.

- **Xeerka Ilaalinta iyo Badbaadada Ilmaha ee Adam Walsh ee 2006** 42USC 671(a)(20)(A) iyo (B). Xukunnada ku aadan dambiyada qaarkood waxay horseedaan ka-saarid khasab ah in uu noqdo ilmo koriye ama waalid korsanaya ama ku noolaanshaha ilmo korinta ama guriga korsashada.
- **Xeerka Adeegyada Ka-hortagga Koowaad ee Qoyska ee 2018** 42USC 671(a)(20)(D). Xukunnada ku aadan dambiyada qaarkood waxay horseedaan ka-saarid khasab ah in ay ka sii shaqeeyaan machadka daryeelka ilmaha (kuwaas waxaa loogu yeeraa wakaaladaha daryeelka ilmaha ee Oregon).
- **Ka-reebitaanada khasabka ah ee CMS** 42USC 1320a – 7(a) Ka saarista shakhsiyaadka iyo hay'adaha qaarkood inay ka qaybqaataan Medicare iyo barnaamijyada caafimaadka gobolka. Wuxuu u baahan yahay ka-saarid khasab ah oo gaar ah oo ku salaysan xukunnada ku lugta leh xadgudubka, khiyaanada ama dambiyada kale. Ka-reebitaankan khasabka ah waxa si gaar ah loogu talagalay shakhsiyaadka ku qoran Liiska Ka-saarida Xafiiska Kormeeraha Guud ee Maraykanka.
- **Xeerka Adeegyada Bulshada iyo Qaranka** 42USC 12645g - Baaritaannada taariikhda dambiga sida ku cad Barnaamijka Deeqda Gobolka Adeegga Bulshada iyo Qaranka, oo u baahan ka-saaritaanada khasabka ah ee tabarucayaasha qaarkood oo buuxinaya shuruudo gaar ah.
- Sharciyada, xeerarka ama deeqaha kale ee federaalka waxay sidoo kale yeelan karaan ka-saarid khasab ah; tusaale ahaan, shakhsiyaadka ka shaqeeya Deeqaha Dhallinyarada ee Ka Cararay iyo Hoy La'aanta ah; la shaqaynta macaamiisha iyada oo loo marayo Xafiiska Dib-u-dejinta Qaxootiga, iwm. U sheeg BCU haddii ay wakaaladaadu leedahay maalgelin ama shuruudo gaar ah.

- **Ka-reebitaannada Khasabka ah ee Oregon** ORS 443.004 - Qaanuunkani wuxuu shaqaalaha qaarkood ka mamnuucayaa in la shaqaaleysiiyo haddii ay leeyihiin xukunno gaar ah.

## QODOBADA KU JIRA TIJAABADA MIISAANKA

Liiska hoose waxaa ku jira arrimo kala duwan oo caadi ahaan ay qiimeeyeen BCU inta lagu guda jiray baaritaanka miisaanka. Qaybaha qaar waxa laga yaabaa in aanay khusaynin SI-ga.

**WADASHAQEYN, DAACADNIMO, IYO ISLA XISAABTAN:**

Shaacinnada SI-ga, qaabka sharaxaada, cadadka tafaasiisha, iwm.: sida SI uu uga jawaabayo baaritaanka asalka iyo ka masuulka noqoshada falalkiisa ama keeda.

SI-ga daacad ma u yahay sida ugu suurtagalsan? Miyuu SI-gu ku marin habaabiyaa sharaxaadiisa ama keeda?

SI-ga ma muujiyaa faham cad oo ku saabsan ficillada, laga yaabee xitaa inuu ka qoomameeyo falalka? SI-ga ma eedeeyaa dadka kale ama ma muujiyaa la xisaabtanka/mas'uuliyadda falalka?

- *Qodobadu waxay noqon karaan qaar ka mid ah calaamadaha ugu wanaagsan ee khatarta ku ah shakhsiyaadka nugul. Haddii SI-ga muujiyo wadashaqeyn, daacadnimo, iyo isla xisaabtan, waxaa yaraanaya fursadda soo noqnoqoshada iyo khatarta uu ku yahay shakhsiyaadka nugul.*
- *Haddii SI-gu leeyahay taariikh muhiim ah, waxaa laga yaabaa in iyada/isaga aanu xasuusan karin dhammaantood, waana caadi in la qirto tan. Sidoo kale waa fikrad wanaagsan in la helo nuqul ka mid ah dhammaan diiwaannada, si uu SI-gu u haysto diiwaannada dambiyada ama xadgudubka oo diyaar ah mar kasta oo loo baahdo.*
- *Marka loo eego shuruucda hadda jirta (oo dhaqangashay 2/1/2023), BCU ugama baahna SI-ga inuu qoro dambiyada laga yaabo inay keenaan u-qalmitaan la'aanta ama uu si tafatiran u galo marka la shaacinaayo. BCU waxay ogaatay in faahfaahinnada dheeraadka ah ee ka imaanaysa SI-ga ay dhab ahaantii ka caawiso tijaabada miisaanka oo ay SI-ga siiso fursad uu ku bixiyo macluumaad aysan cid kale haynin.*

**FAAHFAAHINNADA DHACDOOYINKA ee horseedaya PDQ-yada:**

Maxaa dhacay marka loo eego SI-ga?  Sida ku cad dukumentiyada rasmiga ah (warbixinta booliiska, diiwaannada maxkamadda, iwm.)?

- *Waxay BCU ka caawisaa inay fahmaan waxa dhacay, waxa keenay xariga/eedaynta.*
- *Waxay SI-ga siinaysa fursad uu dhankiisa ama keeda sharaxaad uga bixiyo dhacdooyinka.*
- *Mararka qaarkood haysashada warbixinta booliiska ayaa kaa caawin doonta in la xaqiijiyo sharaxaadda SI-ga.*

- *Diiwaannada maxkamadda ayaa bixiya faahfaahinno, sida taariikhaha cayrinta ama xukumida, shuruudaha tijaabada, iwm.*

**DA'DA, QAANGAARNIMADA, iyo KARTIDA MASKAXEED EE SI-ga marka la joogo wakhtiga PDQ-yada:**

- *Waxay ka caawisaa qiimaynta awoodda SI-gu u leeyahay in uu fahmo ficilladiisa ama ficiladeeda wakhtiga taariikhda hore, iyo sidoo kale saamaynta falalkaas.*

**CADDAYNTA PDQ-yada:**

Ilaha macluumaadka waxaa ka mid noqon kara Nidaamka Xogta Dhaqangelinta Sharciga (Law Enforcement Data System, LEDS), FBI, Shabakada Macluumaadka Cadaaladda ee Oregon (Oregon Justice Information Network, OJIN), maxkamadaha kale, warbixinnada booliiska, ama xitaa SI.

- *Haddii qofku haysto wax dukumeenti ah, sida warbixinnada booliiska, diiwaannada maxkamadda, iwm., inuu bixiya marka uu bilowga yahay baaritaanka asalka waxay dedejin kartaa geeddisocodka.*

**WAQTIGA LAGA SOO BILAABO GUDDIGA ee PDQ-yada:**

- *Waxay gacan ka geysataa go'aaminta haddii uu jiray wakhti ku filan oo lagu muujinayo isbeddelka habdhaqanka; waqti ku filan si loo eego haddii ku celcelintu ay u badan tahay inay dhici karto ama in aysan u badnayn.*

**SHARCIYADA KALE EE AY TAHAY IN LA TIXGELIYO oo daboolaya jagada, xarunta, shaqa-bixiyaha, ama QE-ga ku saabsan PDQ-yada:**

Ma jiraan sharciyo federaali ah, sharciyo Oregon ama Xeerarka Maamulka Oregon (OARs) kuwaas oo si gaar ah saamayn ugu yeesha tijaabada miisaanka ee SI-gan ama jagadan?

- *Sharciyadu waxay saamayn ku yeelan karaan sida taariikhda dambiga ama taariikhda xadgudubka loo arki karo ama loo tixgelin karo. Waxaa jira sharciyo qaarkood oo mamnuucaya in la tijaabiyo miisaanka oo u baahan diidmo.*
- *Dambiyada qaarkood ayaa laga yaabaa inay suurtagaliyaan u-qalmitaan la'aan marka la joogo wakhtiga xukunka, laakiin wakhtiga tijaabada miisaanka hadda gabi ahaanba ma jiraan, sida dambiyada la xiriira haysashada daroogada. Tani waxay dambiyada daroogada siin kartaa miisaan aad u yar; tirada xukunnada ayaa sidoo kale la tixgelin doonaa.*

**QODOBADA U GAARKA AH XADGUDUBKA KEENAYA U-QALMITAAN LA'AANTA:**

Xadgudubka suurtagalka ah ee diidmada waxaa ka mid ah dayacaad halis ah iyo xadgudub dhaqaale, galmo ama jireed oo lagula kacay qofka weyn oo nugul tan iyo 1/1/2010 (arag [Xadgudubka PDQ ee ku aadan dhammaan bixiyayaasha ODHS|OHA]). Dhammaan bixiyeyaasha ODHS, shaqaalaha daryeelka guriga iyo shaqaalaha taageerada gaarka ah, dhammaan noocyada guryaha korinta ee dadka waaweyn, iyo wixii ah bixiyeyaasha OHA ee xiriirka la leh carruurta, lagu helay ama lagu caddeeyey xadgudubka ilmaha ayaa sidoo kale laga yaabaa inay keenaan u-qalmitaan la'aan. Dambiilaha eedaysanaha ah waxa laga yaabaa in uu racfaan ka qaato

baaritaannada xadgudubyada qaarkood. Haddii dukumeentiyada la xiriiraan racfaan ay ka heli karaan BCU wakhtiga tijaabada miisaanka, waa la tixgelin doonaa.

Go'aaminta haddii xadgudubka la caddeeyey ama la aasaasay waxay isticmaashaa heer ka hooseeya marka loo eego kan maxkamadda sharciga xukunnada. Sababtaas awgeed, BCU waxay leedahay arrimo gaar ah oo ay tahay inay tixgeliso oo ku saabsan xadgudubka laga yaabo inay keenaan u-qalmitaan la'aanta:

- Dabeecada iyo nooca xadgudubka (macluumaadkan waxay ku jiraan warbixinta baaritaanka)
- Macluumaad kale ee la uruuriyay intii uu baaritaanku socday
- Taariikhda dhacdada xadgudubka iyo baaritaanka xadgudubka
- Tayada baaritaanka (dhammaystirnaantiisa, ujeedadiisa, iyo ku filnaantiisa)
- Nidaamka cadaaladeed (dambiilaha lagu eedeeyay miyuu faahfaahin ka bixiyay eedeynta, dambiilaha lagu eedeeyay ma ka qaybqaatay baaritaanka; ka waran haddii wax xuquuq racfaan ah la siiyo dambiilaha lagu eedeeyay iyo natiijada ka soo baxda racfaankaas)
- Tallaabooyin kasta oo sixid ah oo loo baahan yahay dhammaadka baarista iyo u hoggaansanaanta dambiilaha eedaysanaha ah

Tijaabada miisaanku waxa ku jira tixgelinta arrimahan marka ay diyaar u yihiin BCU. Tixgelinta xadgudubka u-qalmitaan la’aanta suurtagalka ah ee tijaabada miisaanka ayaa si gaar ah muhiim u ah marka la eego dabeecadda xadgudubka:

- *Dhibanaha la soo sheegay mar kasta waa shakhsi nugul, sidaas darteed xadgudub diidmo kasta oo suurtagal ah ayaa laga yaabaa inuu aad ugu habboon yahay jagada cusub ee la shaqeeya shakhsiyaadka nugul.*
- *Shuruudaha iyo tallaabooyinka loo baahan yahay ee ka dhashay xadgudubka lagula taliyay ama lagu soo rogay dambiilaha eedaysanaha ah (SI) ayaa sidoo kale aad ugu habboon tijaabada miisaamidda sababtoo ah waxay muujin karaan waxa SI-gu looga baahan yahay inuu sameeyo si dib loogu soo celiyo booska daryeel bixiyaha.*

**MUDADA XABSI KU HAYNTA oo ay ku jiraan dhaqancelinta ama saameynaha kale ee saaran SI-ga:**

Inta jeer ee SI lagu xukumay xukun keenaya u-qalmitaan la'aan suurtagal ah iyo inta wakhti ee uu run ahaantii shaqeeyay/shaqaysay.

- *Waxay gacan ka geysataa go'aaminta halista xukunnada ama xadgudubyada tijaabada.*
- *Qodobada kale waxaa ka mid ah siideynta hore, haddii siideynta dhowaan ay ahayd, haddii SI-gu soo maray wakhti uu ku beddelo handhaqanka, iwm.*

**U HOGAANSANAANTA SIIDAYN SHARAFEEDKA AMA TIJAABADA:**

Soo koob u hogaansanaanta siidaynta tijaabinta/sharafeedka ee la xiriirta PDQ-yada.

- *Waxay ka caawisaa go'aaminta la-xisaabtanka iyo mas'uuliyadda, awoodda uu u leeyahay raacitaanka sharciyada iyo xeerarka, iyo xiisaha/u heellanaanta beddelka habdhaqanka ee SI-ga.*

**DHIBAATOOYINKA ISTICMAALKA KHAMRIGA IYO MUKHAADARAADKA:**

Sharaxaad ka bixi arrimaha ay ku jiraan daawaynta, soo noqoshada, iwm. si toos ah ula xiriira PDQ-yada.  SI-ga ma u muuqdaa inuu ka faa'iiday daawaynta?

- *Qabatinku waa xaalad caafimaad, laakiin marka ay jiraan PDQ-yo la xiriira qabatinku balwadda, waa muhiim in la qiimeeyo miyir-qabka SI iyo u heellanaanteeda—isticmaalka dheeraadka ah mukhaadaraadka waxay u horseedi kartaa in PDQ-yo dheeraad ah la siiyo taariikhda SI-ga.*
- *Bixiyeyaal badan ayaa fursad u haysta inay la shaqeeyaan dadyow kala duwan. Haddii ay jireen dhibaatooyin ku takri-falka mukhaadaraadka ee la xiriira taariikhda hore ee dambiilaha, hor-u-socodka iyo guusha laga gaaro daawaynta SI-ga ayaa ah arrimo togan oo ay tahay in lagu daro tijaabada miisaamida.*

**DAAWAYNTA KALE:**

Sharaxaad ka bixi daawaynta sida tooska ah ula xiriirta PDQ-yada, sida Hadalka Xatooyada, Maaraynta Xanaaqa, daawaynta, la-talinta, iwm. SI-ga ma u muuqdaa inuu ka faa'iiday daawaynta?

- *Waxay ka caawisaa in la go'aamiyo isbeddelka habdhaqanka, haddii habdhaqammo kala duwan oo aan dambi ahayn lagu barto, iyo in la qiimeeyo isbeddellada kale ee nolosha ee guuleysta.*

**SOO NOQNOQOSHADA:**

Soo koob suurtagalnimada ku soo noqnoqoshada habdhaqanka dambiga ama habdhaqamada horseedaya xukunnada keenaya u-qalmitaan la'aanta ama shuruudaha.

- *Waxay gacan ka geysataa go'aaminta haddii ay jirto khatar joogto ah ama calaamad muujinaysa in khatarta si weyn loo dhimay.*

**HAWLAHA FAL-DAMBIYEEDYADA KALE:** *[**KALIYA** waxaa loo tixgeliyaa SI-yada wakaaladaha daryeelida ilmaha ee Xannaanada Carruurta, SI-yada la xiriira guryaha korinta ee ay shatiga siiyeen wakaaladaha daryeelka ilmaha, ama shakhsiyaadka la xiriira bixiyeyaasha daryeelka ilmaha ee hoos yimaada Xannaanada Maalinta ee La Xiriirta Shaqada ODHS]*

Xarigyada kale, eedeymaha, ama xukunnada kale ee aan suurtagal ahayn in la diido.

- *Waxay ka caawisaa go'aaminta haddii uu jiro qaab.*

- *Waxay caawisaa aqoonsashada habdhaqanka kale ee aan laga yaabin inay keenaan u-qalmitaan la'aan sida ku cad xeerarka laakiin waxay muujin kartaa khatar halis ah oo ku aaddan shakhsiyaadka nugul.*

**ISBEDDELKA LAGA SOO BILAABO PDQS:**

Sharaxaad ka bixi isbeddelada laga soo bilaabo xukunnada ama shuruudaha laga yaabo inay keenaan u-qalmitaan la'aan. SI waxa uu bixin karaa macluumaad kasta oo iyadu/isaga ay aaminsan yihiin in ay ku habboon tahay tixgelinta BCU. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah laakiin aan ku xaddidnayn waxbarashada, taariikhda shaqada, taariikhda shatiga/shahaadaynta, iyo ku talinta shaqa-bixiyaha.

- *Muxuu SI-ga sameeyay laga soo bilaabo PDQ-yadiisa/deeda?*
- *Sidee ayay iyada/isaga u yareeyeen suurtagalnimada khatarta ku aaddan shakhsiyaadka nugul?*
- *BCU waxay tixgelin doontaa macluumaad kasta oo uu bixiyo SI.*

**KU HABBOONAANTA JAGADA:**

Sharaxaad ka bixi sida PDQ-yada SI-ga ay u khuseeyaan ama aysan u khusayn jagada. Sharaxaada jagada waxay bixisaa macluumaad ku saabsan waajibaadka ama bee'ada shaqada.

Inta badan SI-yadu waa wariyayaal khasab ah, taasoo la micno ah in isaga/iyada ay tahay in ay soo sheegaan dhacdooyin aan caadi ahayn oo ay ku jiraan kuwa ay iyada/isagu sababay.

Jagada, xiriirkee ayuu SI-ga la yeelan doonaa shakhsiyaadka nugul, iyo xogtooda, hantidooda, gurigooda, lacagahooda, ama daawooyinkooda gaarka ah? PDQ-yadu ma ku habboon yihiin xiriirka noocaas ah?

PDQ-yadu miyay muujiyaan xukun xumo ku saabsan badqabka nafteeda ama kuwakale?

Haddii PDQ-yadu aysan ku habboonayn jagada, sharaxaad ka bixi sababta.

- *Qaanuun ahaan, BCU waa inay tixgelisaa PDQ-yada SI-ga iyo "xiriirka" ku aadan jagada ama bee'ada shaqada. Haddii taariikhda dambiilaha ay u muuqato mid khuseysa (tusaale, waxyeelaynta dadka kale, xatooyada aqoonsiga dadka kale), tani waxay muujinaysaa khatar cad oo ku wajahan shakhsiyaadka nugul.*

## SOO KOOBITAANKA IYO GO'AANKA

Marka la dhameeyo qaybaha sare, BCU waxay uruurisaa macluumaadka waxayna waydiisaa su'aasha: Malaha, SI miyay shakhsiyaadka nugul u geysataa khatar jireed, shucuureed ama fayoobi dhaqaale?

Haddii SI intii ugu badnayd ay uga badan tahay inaysan u keenin khatar, BCU waxay samayn doontaa go'aan jir dhiska ee la ansixiyay.

Haddii PDQ-yada iyo cadaymaha ay muujinayaan in si ka badan ay u badan tahay in SI ay khatar ugu tahay fayoqabka shucuureed, jireed, ama dhaqaale ee shakhsiyaadka nugul, BCU waxay samayn doontaa go'aanka jir dhiska ee la diiday.

Haddii ay suurtagal tahay in la xaddido waajibaadka SI ama bee'ada si loo yareeyo khatarta soo gaaraysa shakhsiyaadka nugul, BCU waxay samayn doontaa ansixin xaddidan.

Haddii la diido ama la siiyo ansixin xaddidan, SI wuxuu xaq u leeyahay dacwad-dhageysi.

LIFAAQYADA LAGU ISTICMAALAY DUKUMEENTIGAN

Fiiro gaar ah: Inta badan lifaaqyadan ma hoos yimaadaan xakameynta ODHS|OHA. Raac lifaaq kasta si aad u aragto haddii boggu leeyahay turjumo la heli karo.

*Lifaaqa dambiilaha PDQ ee ku aadan SI-yada la xiriira wakaaladaha daryeelka ilmaha: https://www.oregon.gov/odhs/background-checks/Documents/pdq-criminal-all.pdf*

*Liiska dambiyada PDQ ee loogu talagalay dhammaan bixiyayaasha kale ee ODHS|OHA: https://www.oregon.gov/odhs/background-checks/Documents/pdq-criminal-tier-3-so.pdf*

*Xadgudubka PDQ ee ku aadan dhammaan bixiyayaasha ODHS|OHA: https://www.oregon.gov/odhs/background-checks/Documents/pdq-abuse-provider-so.pdf*

OAR 407-007-0281: https://secure.sos.state.or.us/oard/viewSingleRule.action?ruleVrsnRsn=278856

OAR 407-007-0290: https://secure.sos.state.or.us/oard/viewSingleRule.action?ruleVrsnRsn=278858

42USC 671(a)(20)(A) and (B): https://www.govinfo.gov/app/details/USCODE-2021-title42/USCODE-2021-title42-chap7-subchapIV-partE-sec671

42USC 671(a)(20)(D): https://www.govinfo.gov/app/details/USCODE-2021-title42/USCODE-2021-title42-chap7-subchapIV-partE-sec671

42USC 1320a – 7(a): https://www.govinfo.gov/app/details/USCODE-2021-title42/USCODE-2021-title42-chap7-subchapXI-partA-sec1320a-7

Liiska Ka-saarida Xafiiska Kormeeraha Guud ee Maraykanka: https://exclusions.oig.hhs.gov/

42USC 12645g: https://www.govinfo.gov/app/details/USCODE-2021-title42/USCODE-2021-title42-chap129-subchapI-divsnF-sec12645g

ORS 443.004: https://www.oregonlegislature.gov/bills_laws/ors/ors443.html